



## **Waaxda qurba-jooga**

JUNE 06/2026

### **Bogaadin ku socota Qurba-joogga Somaliland Qabashadii Xuska Maalinta Qaran ee 18 May 2026**

Agaasinka Waaxda Qurba-joogga ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda & iskaashiga Caalamiga ah JSL waxaa si weyn ugu bogaadinayaa muwaadiniinta qurba-joogga jaalliyadaha Somaliland ee daafaha adduunka sidii midnimada qaran iyo isku-duubnida lahayd ee ay ugu dabbaal-degeen xus-qarameedka sannad-guurada 35aad ee ka soo wareegtay la soo noqoshada qaranimada Somaliland, 18 May 2026.

Jaalliyadaha Somaliland waxay ku qabteen xuska Maalinta Qaran ee 18 May, si shucuur waddaninimo iyo xamaasad sare leh, maadaama uu ahaa sannadkii koowaad ee xuskani yimaaddo iyada oo la aqoonsan yahay Jamhuuriyadda Somaliland. Muwaadiniinta qurba-joogga Somaliland waxay ka oogeen xus-qarameedka 57 magaalo oo ku kala yaalla 24 waddan, kuwaas oo wadartooda lagu qabtay 63 munaasibadood.

18 May iyo 26 June ba waa laba taariikhood oo uu leeyahay dalka Somaliland, kuwaas oo sheegaya markii ay Maxmiyadii Ingiriiska ee Somaliland ka qaadatay xorriyadeeda Boqortooyadii Midawday ee Ingiriiska & Ayrlaan 26 June 1960, iyo markii ay umadda Somaliland la soo noqotay qaranimadeeda kadib midawgii aan sharciga ahayn ee burburay 18 May 1991, isla markaana ay dib uga tashadeen aayahooda.

Sidaa darteed, Agaasinka Waaxda Qurba-joogga waxaa uu ugu baaqayaa guddiyada iyo ururada jaalliyadaha qurba-joogga Somaliland in ay weyneeyaan xus-qarameedka sannad-guurada 66aad ee ka soo wareegtay Maalinta Madaxbannaanida Somaliland 26 June 2026 (Somaliland Independence Day).

#### **Sannad-guuro Wacan**

**“Aqoonsi & Adkaysi”**

**Waaxda Qubajooga WADIC JSL.  
Hargeisa Jamhuuriyada Somaliland**

